



KANI CUNUGAAGA MIYAA ?




Caruurta kale lama ciyaaro

Ilmahaani waxay jecelyihiin inay kalidood ciyaaraan. Mana xiiseeyaan inay la ciyaaraan caruurta facood ah, marka la ciyaarayaan caruurta kale ee facooda ah sharciyada ama bka cayaartu u socoto ma raaci karaan. Way ka dhega adaygaan furdaha ay kaga qaybqaadan karaan waxhyaabaha caruurta kale samaynayso ama guriga laga samaynayo.




Ilmahani waxaa laga yaabaa inaanay wax jawaab ah bixin haddii dadka kale magaciisa/magaceeda ugu yeeraan.

Ilmahaani haddii loo dhawaaqo ama loo yeero qofka u yeeraya ma soo fiiriyaan ama xagiisa uma soo jeestaan. Isla marka wax jawaab ah ma bixiyaan haddii loo yeero.




Dadka kale markay hadlayaan ma fiiriyo mana hadlo.

Ilmahaani wuxuu ka dhoowsadaa inuu si toos ah indhaha uga eego dadka waawayn, walaalihiis, iyo caruurta faciisa ah. Ilmahaani si toos ah wajigiisa ama madaza uguma soo joodiyo qofka uu la hadlayo. Waxaa laga yaabaa inuu muuqdo qof dhega la' marka lala hadlayo.



Ilmahaani waxyaabaha ay caruurta kale samayayaan si isku mid ah uma sameeyaan.

Waxaa laga yaabaa inaanay ilmahaani kalmadaha ama jumladaha siday yihiin waraaqaha ugu guurin. Waxaa laga yaabaa inaanu dadka canjilin, ama hadalkii qof yiraahdo sidiisii ugu soo celin, ka soo qaad haddii lagu yiraahdo waxaad tiraahdaa "Cooke" inuu si kale u yiraahdo. Waxaa laga yaabaa inuu sidda dadku wax u arkaan si duwan u arko.




Ilma aan kuu sheegayn marka wax ku dhadcaan ama dhaawac gaaro

Ilmahaani waa qof aan xanuunka aad u dareemin, haddiiba wax gooyaan xanuunka aad ayuu ugu adkaystaa. Waxaa laga yaabaa inuusan si fiican uga gilgilan cimilada aadka u kulul ama u qaboow sida marka biyaha qubaysku aad ugu kulul yihiin, dheriga kulul ama barafka aadka u qaboow.



Ilmahaani aad ayey u xanaaqaan haddii qorshihii lagu socday ama sidii wax loo samaynayey la badalo.

Ilmahaani waxay jecelyihiin inay wax waliba si la saadaalin karo ama sidii ay marwalba ku imaan jireen u dhacaan. Waxayna jecelyihiin inay waxwaliba sidooda ahaadaan. Waxaa laga yaabaa inay ilmahaani had iyo jeer doortaan hal nooc oo cunta ah, hal nooc oo dhar ah, bug isku mid ah, ama hal nooc oo fiidyow ah iwm. Ilmahaani wuxuu u muuqdaa inuu had iyo jeer jecelyahay ama ku farxo waxyaabaha isku midka ah isla markaasna ka xanaaqo haddii arimuhu siyaabo is khilaafsan u dhacaan.




Ilmahaan waxaa siyaabo badan ugu adag inay toyska ku.

Waxay u badantahay inaanay ilmahaani toyska ugu cayaarin si la mid ah siyaabaha ilmaha kale ugu ciyaaraan. Waxay u badantahay in ilmahaani doortaan inay toyskia saf dheer oo siman galiyaan, isla markaasna ka xumaadaan haddii qof kale soo fara galiyo habkaas ay wax u samaynayaan. Ilmahaani waxay u muuqdaan inaanay xirfada ahaan ciyaartiisu u korayn sida caruurta kale.

Ilmahaani waxaa dhici karta inuu wax yar aad uga xanaaqo si sahlanan looma maslixi karo haddii ay xanaaqaan.

Ilmahaani waxaa laga yaabaa inay ooyaan oo cabasho badan sameeyaan ayadoo aanay jirin sabab ahi. Waxaa laga yaabaa inay saacado dhan ka caraysnaadaan wax aad u yar. Waxaa dhici karta inay aad u adkaanto in la dajiyo ama loo maslaxo si la mid ah sida ilmaha kale ee ay isku da'da yihiin loo maslaxo. Inta badan way ku adagtahay ilmahaan inay soo gudbiyaan waxyaabaha ay tabanayaan. Waxaa laga yaabaa inay ka gilgishaan in kor loo qaado, waalidku tutumo ama lulo, amase waxaa laga yaabaa inay



jecelyihiin in hal qof (badanaaba hooyada) laabt ku qabto oo shuunshaamiyo.



Ilmahaani hadalka way ku celiyaan halkii ay ka jawaabi lahaayeen.

Markii su'aal la waydiiyo cunugu waxaa laga yaabaa halkii uu su'aasha ka jawaabi lahaa uu su'aashii ku celiyo. Waxaa lagayaaba in ilmahaani had iyo hal wax oo isku mid ah hadal hayo oo ku soo celceliyo, ama uu hal su'aal had iyo jeer dadka waydiiyo.